

HAANSHITHA HAQIIQTA EE HELAYAALKA II DARYEELAYAALKA ISTI'MAALKA DEGDEGA EH EE OGOLAANSHAGA (EUA) EE TALLAALKA MODERNA COVID-19 OO KU HORSEETHAASA JIROOHA FAYRASKA KORONA 2019 (COVID-19) OO SHAQSIYAADKA 18 SANA JAR II KU WIIN

May laka siiyey Tallaalka Moderna COVID-19 si an ku horseeta Jirootha Fayraska korona 2019 (COVID-19) oo sababaw SARS-CoV-2. Haanshithun Haqiiqta may wathatee aqbaar kii kaalmeeyaasa fahamka halisoo ii faa'idooyinka Tallaalka Moderna COVID-19, taas oo atha hela korto sababtoo eh may hatta jartee jirootha safmarka COVID-19.

Tallaalka Moderna COVID-19 may buwaa tallaal oo may koo illaaliyi kortee inii kii dhiya COVID-19. Ma jaraan ansihiyowka bathee'atha Maamulka Raashiinka ii Daawooyinka Mareykanka (FDA) oo tallaalka lanku horseethaw COVID-19.

Aqri Haanshithun Haqiiqta aqbaarta quseyta Tallaalka Moderna COVID-19. La hathal bihiyaaga tallaalka hattii atha su'aala qobto. Maybuwaa dooqaa inii atha hela Tallaalka Moderna COVID-19.

Tallaalka Moderna COVID-19 may la siiyeey 2-garoojo tahane eh, 1 bil qiib eh, oo murqoo laku siiyaw.

Tallaalka Moderna COVID-19 qof kasta ma illaaliyi koro.

Haanshithun Haqiiqta may luku yaabee inii la usbooneysiya. Walaagii Haanshitha Haqiiqta dhawaan eh, tafathal fiiri www.modernatx.com/covid19vaccine-eua.

WALAAGII ATHA AN BAAHANTA INII OGAATA KU HOR INTII ATHA AN HELNA TALLAALKUN

MAYU COVID-19?

COVID-19 may sababey fayraska korona oo lan kasaw SARS-CoV-2. Noo'un oo fayraska corona eh hor mal an aragna. May kii kidhiyi koree COVID-19 an dhawaathowka dadka kala ee fayruska qobaan. May buwaa bathanshoo jirootha neefta oo saameeya korta hubnoo kala. Dadka qobaan COVID19 may lahaatheena aastaama bathan oo shal duwan oo la hasheegi, oo eh aastaamoo dhehaadka ilaa jirootha daran. Aastaamo may an muuqatha koraana 2 illaa 14 gee kudib deerowka fayraska. Aastaamoo may ka jara koraana: qandha ama qarqarnyi; qufa; nefta oo yaraata; daal; murqo ii jir dhuura; matha dhuura; lumitaanka usub ee urta ii dhadhanka; dhuun dhuura; iriiriga sanko ii sanko deethahaw; lalaba ama manda; shubun.

MAYU TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Tallaalka Moderna COVID-19 may buwaa tallaal lan ansihiina oo luku yaaba inii illaaliyaw COVID-19. Ma jaraan tallaal ansihiyeen FDA oo lanku horseethaw COVID-19.

FDA may ansihithey isti'maalowka degdega eh ee Tallaalka Moderna COVID-19 si lan ku hor seethaw COVID-19 oo shaqsiyaadka 18 sanna jarka ii ku wiin Ansihiyowka Isti'maalka Degdega eh (EUA).

Walaagii aqbaar dheeraad eh ee EUA, fiiri “**Mayu Ansihiyowka Isti'maalowka Degdeg eh (EUA)?**” qiibta dhammaadka Haanshithun Haqiiqta.

MAY HAYTI INII AN SHEEGTA BIHIYAAGA TALLAALKA KU HOR INTII ATHA AN HELNA TALLAALKA MODERNA COVID-19?

An sheeg bihiyaagaa tallaalka wal quseeya dhamaan haalathoogaa aafimaat, oo ka jaraan hattii:

- qobto wal alaarji eh
- qabto qandha
- qobto jirootha dhiig bahowka ama ka jarta qafiifiska dhiiga
- qobto difaa'a jirka hooseeya ama qaathathoyta daawatha saameeyaasa difaa'a jirka
- uur eta ama qorsheeyoyta inuu uur nagata
- naas nuujuyoyta
- atha heli tallaalka oo COVID-19

AY HAYTI INII HELA TALLAALKA MODERNA COVID-19?

FDA may ansiihiithey isti'maalowka degdega eh ee Tallaalka Moderna COVID-19 oo shaqsiyaadka 18 sanna jarka ii ku wiin.

AY HAYTI INII AN HELNA TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Waa inii helaa Tallaalka Moderna COVID-19 hattii atha:

- qobto falnagowka alaarjiga daran kudib garoojo hora oo tallaalkun eh
- qobto falnagowka alaarjiga daran oo ka daraw kasta oo tallaalkun eh

MAYU KA DAROWKA KA JARAAN TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Tallaalka Moderna COVID-19 may wathathee ka darowka higaan: messenger ribonucleic acid (mRNA), lipids (SM-102, polyethylene glycol [PEG] 2000 dimyristoyl glycerol [DMG], cholesterol, ii 1,2-distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine [DSPC]), tromethamine, tromethamine hydrochloride, acetic acid, sodium acetate, ii sucrose.

SITHEE LAN SIIYEE TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Tallaalka Moderna COVID-19 may la kin siiyey sithii irbida laka duraw murqoo. Tahanaaga

tallaalka ee Tallaalka Moderna COVID-19 may buwaa 2 garoojo oo la siiyaw 1 bil qiib eh.

Hattii atha hela hal garoojo oo Tallaalka Moderna COVID-19, may buwaa inii atha hela garoojo lamaad oo isku tallaalkun eh 1 bil kudib si an dhamaasirta tahanaaga tallaalka.

HORAA LAN ISTI'MAALEEY TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Tallaalka Moderna COVID-19 may buwaa tallaalka lan ansiihiina. Tijaabooyinka aafimaatka, qiyaastii 15,400 shaqsiyaad 18 sanna jar eh ii ku wiin yaa heleen an ka yaraan 1 garoojo oo Tallaalka Moderna COVID-19.

MAYU FAA'IDOOYINKA TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Tijaabo caafimaad oo socoto, Tallaalka Moderna COVID-19 wuxuu muujiyay inuu ka hortago COVID-19 may hige 2 garoojo oo la siiyaw 1 bil qiib eh. Muddatha saathiilan ka aadan COVID-19 hatta mal ka saw.

MAYU HALISOO TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Saameynatha aafimaatka ee la haku sheegi Tallaalka Moderna COVID-19 ma ka jaree:

- Falnagowga dhiniga irbada: dhuuraga, adkaanshaga ii bararka hinjiroo oo isla galanta irbada, barar (adkaanshaga), ii gathuuthashatha
- Saameynatha aafimaatka guud: daalka, matha dhuuraga, murug dhuuraga, hubna dhuuraga, qarqarnya, lalaba ii manda, ii qandha

May jaraana fursada fog oo Tallaalka Moderna COVID-19 sababa koro falnagowka alaarjiga daran. Falnagowka alaarjiga daran may aatha haan ka dhiyey dhoor dagiiga kuthushoo oo hal saa' kudib maddii hela garoojatha Tallaalka Moderna COVID-19. Sababtun dartiye, bihiyaaga tallaalka may ka warsatha koree inii roogta meela atha ku heli tallaalka oo kormeerowka markaas kudib tallaalka Aastaamoo falnagowka alaarjiga daran may ka jaree:

- Dhibaatatha neefsashatha
- Bararka foolkaa ama dhuunta
- Wadna garaa'a degdega eh
- Nabra hun oo jirkoo oo dhan eh
- Dawaqaada ii tabar daraatha

Haan kulushoo mana qotho karaan saameyn aafimat suuragal eh ee Tallaalka Moderna COVID-19. Saameeyowka aafimaatka dhabte eh oo lan filathaana dhiyi koraan. Tallaalka Moderna COVID-19 weli may laka barathooye tijaabooyinka harumoo aafimaatka ah.

MAY KA SUUBIYEY SAAMEYNATHA AAFIMAATKA?

Hattii atha la kulanta falnagowka alaarjiga daran, han weer 9-1-1, ama booqoy isbitaalka kii dhow.

Han weer bihiyaaga tallaalka ama bihiyaaga daryeelka aafimaatka hattii atha qobto wal saameeyowka aafimaatka ah oo ka dhibaw atha ama kiinku dhammaana.

Han sheeg saameynatha aafimaatka **Nithaamka Wargelyowka Tallaalka Dha'thatha Hun ee FDA/CDC (VAERS)**. Lambarka taleefonka bilaashka eh VAERS may buwaa 1-800-822-7967 ama haka sheeg onleenka <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Tafathal ka dar "Tallaalka Moderna COVID-19 EUA" ee leenka koowaad ee sanduuqa #18 ee foomka wargelyowka.

Intaas may dheera, may haka sheega korto saameynatha aafimaatka ee ModernaTX, Inc. 1-866-MODERNA (1-866-663-3762).

May sitho kala laka siiya koree iqtityaar lanisku diiwaangeliyaw **v-safe**. **V-safe** may buwaa qalab ka shaqeeyaw mobeelatha asraga eh oo iqtityaar usub oo isti'maalaw fariimaaga qoraalka ii sahamatha websaydka si lanla fiiriya dadka lan tallaalu inii aqoonsathan saameeyowka aafimaatka tallaalka COVID-19 kudib. **V-safe** may warsathaasee su'aala ka aawiyaw CDC inii kormeeraan badbaathatha tallaalka COVID-19. **V-safe** may saas oo kala biyey hasuusiyaal lamaad oo an dhow hattii lan baahatha oo ka noolaathaw dabagalowka CDC hattii ku qaathayaalka hasheegaan saameeyowka aafimaatka oo wiin oo higta tallaalka COVID-19. Walaagii aqbaar eh oo sitha lanisku diiwaangeliyaw, booqoy:

www.cdc.gov/vsafe.

KUWARAN HATTII ANA GO'AANSATHA INII ANA QAATHATHA TALLAALKA MODERNA COVID-19?

Dooqaawu inii atha qaathata ama aan qaathana Tallaalka Moderna COVID-19. Hattii atha go'aansata inii an qaathana ma badelaasa heerkaa daryeelka aafimaad.

JARAANAA DOOQYA KALA OO LAN HELA KORO SI LAN KU HORSEETHA TALLAALKA COVID-19 MADII LAKU BIYA MODERNA COVID-19?

Hatta, ma jaraan tallaalka kala oo FDA ansiihiithi oo la hela koro oo lanku horseethaw COVID-19. Tallaalatha kala oo ku horseethaw COVID-19 may laka hela koree sitha quseyta Ansihiyowka Isti'maalka Xaalathoo degdeg eh.

LA QAATHATHA KOREE TALLAALKA MODERNA COVID-19 TALLAALATHA KALA?

Ma jiraan wal aqbaar eh oo la isti'maalowka Tallaalka Moderna COVID-19 ee tallaalka kala

KUWARAN HATTII ANA UUR LAHA AMA NAAS NUUJIYOOLA?

Hattii atha uur leta ama naasnuujiyoyta, kula hathal afkaarooqaa daryeel bihiyaaga aafimaatka.

TALLAALKA MODERNA COVID-19 II RITHEEY COVID-19?

May. Tallaalka Moderna COVID-19 ma wathatha SARS-CoV-2 ii maka siiya kora COVID-19.

HAYSOOY KAARKAA TALLAALKA


Maddii atha hela garoojathaa koowaad, may helaasee kaarka tallaalka oo muujiyaw maddii han naqathaasa garoojathaa lamaad oo Tallaalka Moderna COVID-19. Hasuusoy inii la koyta kaarka maddii han naqathaasa.

AQBAAR DHEERAAD EH

Hattii atha su'aala qobto, booqoy websaydka ama han weer lambarka taleefonka oo hoos

laka sheegi. Si an gala Haanshitha Haqiiqo dhawaan, tafathal sawir koodhka QR oo hoos

laka sheegi.

Websaydka Tallaalka Moderna COVID-19	Lambarka Taleefonka
<p>www.modernatx.com/covid19vaccine-eua</p> 	<p>1-866-MODERNA (1-866-663-3762)</p>

SITHEE YAA AMBARATHA KORO WAL BATHAN?

- Warsoy bihiyaaga tallaalka
- Ku booqoy CDC <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>
- Ku booqoy FDA <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>
- La hiriir laanta aafimaatka gobolkaa ama deegaanka

INTEE LAKA QOREE AQBAARTA TALLAALKEY?

Bihyaaga tallaalka yaa ka dara koro aqbaarta tallaalkaa Nidaamka Aqbaarta Tallaalka gobolkaa/deegaankaa (IIS) ama nidaamka kala ee lanka tallagali. Tan may hubiyaasee inii atha hela isla tallaalka maddii atha han naqathaasa garoojatha lamaad. Walaagii aqbaar eh ee quseeya IISs, booqoy:

<https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

MAYU BARNAAMIJKA MAGDHOWKA EE TALLAABADA KU HORSEETHOWKA DHAAWA'A?

Barnaamijka Magdhowka ee Tallaabada ku Horseethowka Dhaawa'a (CICP) maybuwaa barnaamij fatheraal oo kii kaalmeeya koro biyowka qarashaadka daryeelka aafimaatka iyo qarashaadka kala ee qaaska eh oo dadka qaarshoo oo si daran anka dhaawa'mi daawooyinka qaar ama tallaalatha, oo ka jaraan tallaalkun. Guud haan, sheegashatha waa inii lanka gudbiyaa CICP hal (1) sanna guthashoo oo ku bilaabathaasa helowka tallaalka. Si wal bathan anku baratha barnaamijkun, booqoy www.hrsa.gov/cicp/ ama han weer 1-855-266-2427.

MAY LAKA JEETHA ANSIHIYOWKA ISTI'MAALOWKA DEGDEGA EH (EUA)?

FDA ta Ameerika yaa ka diyaarithi Tallaalka Moderna COVID-19 sitha waafaqsan

farsamatha helowka degdeg eh oo la dhahaw EUA. EUA may taageerey Hoghayaaga Aafimaatka ii Atheega Aadanaaga (HHS) oo daruufoo jaraan si sabab lan ku weela isti'maalowka degdega eh ee daawooyinka iyo batheoo'yinka noolaga intii laka jara jiratha safmarka COVID-19.


Tallaalka Moderna COVID-19 ma marna isla noo'a fiiriyowka bathee'ooyinka ansihiyeen ama haqiiyiyeen FDA. FDA may suubiya kortee EUA maddii sharuuda qaar la buuya, taas oo ka jarta inii an jarna, badela la ansihiyi, oo la hela kora. Intaas may dheera, go'aanka FDA may ka saleysanyaa guud haan adeynta sayniska ee la hela koroo muujiyaasa inii bathee'ada waltar an leta ku horseethowka COVID-19 intii laka jara jirootha safmarka COVID-19 ii kan faa'idooyinka laka saw ama kooyo koro oo bathee'atha may abiraasee halisoo laka saw ama kooyo koro ee bathee'atha. Kulushoo sharuudun waa inii la buuyaa si an ka golaata bathee'atha inii lanka isti'maala intii laka jara jiratha safmarka COVID-19.

EUA oo Tallaalka Moderna COVID-19 may shaqeeyaasee mudatha ka dhawaaqowka COVID-19 EUA oo sabab an weelaasa isti'maalowka degdega eh ee bathee'ooyinkun, illaa la roojiya ama laku laabatha (kudib oo bathee'atha markala lanka isti'maalna).

©2020 ModernaTX, Inc. Xaquuqoo oo dhan dhoorsanyiin.

Leesinka (leesamoo): www.modernatx.com/patents Reed lan

fiiriyi: 12/2020



Reed lan fiiriyi: 12/2020